

Xuquuqdaada, Noloshada

TALO HAGEEYSA LOOGU TALAGALAY

DHALINYARADA KUJIRO XANAANADA FOSTER-KA



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Mawduucyada

HORDHAC.....	1
BAD-QABKA IYO WANAAGA	2
DHAGEYSIGA DACWADAHA EE MAXKAMADA	4
LIISKA ERAYADA CUSUB EE SHARUUDAHA MAXKAMADA.....	5
MEELAYN IYO BOOQASHADA	6
WAXBARASHO.....	8
DARYEELKA CAAFIMAADKA.....	10
MASUULIYADAHA SHAQAALAHA KIISKA	12
TALOOYIN DHEERAAD AH.....	14

Afeef: Buug-gacmeedkaan waxaa loogu talagalay hagitaan wax ku ool ah oo loogu talagalay dhallinta ku jirta xanaanada foster-ka. In kasta oo ay tixraacayso sharciyo iyo qawaniin ee saameyn ku yeelan kara dhalinta foster-ka, ma bixiso talo sharciyeed iyo macluumaadka ku qoran buuggaan looma adeegsan karo ama la iskuguma haleyn karo sidii talo sharciyeed. Dhalinyarada raba inay ogaadaan sida sharciyada ama qawaaniinada loogu dabaqi karo xaalad gaar ah waa inay la xariiraan qareenkooda, shaqaalaha kiiskiisa, Guardian Ad Litem (GAL), Office of the Family and Children's Ombuds.

Xuquuqdaada, Nolashaada Waa talo loogu talo galay dhalinyarada ku jirta daryeelka korniinshaha, da'da 12 iyo ka weyn, oo ay kujiraan dhalinyarada kujira xarumaha daryeelka koox. Macluumaadka buug-gacmeedkaan waxaa si gaar ah loogu qoray dhalinyarada da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn. Shuruucda ama qawaniinta qaarkood ayaa yeelan kara kudhaqmid da' daha kala duduwan waxaana lagu cadeeyay buug-gacmeedkaan hadba sida loogu baahdo.

Buugaan waxaa loosameeyay sidii:

- Laguugu sheegi lahaa xuquuqdaada, sida lagu qeexay laguna ilaaliyay sharciga gobolka Washington.
- Laguugu dhiirigelin lahaa adiga inaad si firfircoon uga qaybgasho kiiskaaga ku tiirsanaanta iyo daryeelka aad hesho inta aad kujirto daryeelka korniinshaha.
- Laguu bari lahaa adiga wax kusaabsan sharciyada kala duwan ee adiga ku saameeya muddada aad ku jirto xanaanada foster-ka, iyo sidoo kale waxaad ka filan karto shaqaalaha kiiskaaga.

Yaa kujiro looguna talagalay daryeelka korniinshaha?

Qof dhalinta yar ayaa ku jira daryeelka korniinshaha haddii isagu ama iyadu ku jiro gacanta Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Gobolka Washington ee Carruurta, Dhallinta, iyo Qoysaska) oo laga reebay waalidkiis ama mas'uulkiisa. Tan waxaa ku jira in laguhaayo guriga qoyska korinta, guriga qaraabada, guriga dadka qaangaarka ah ama guriga kooxaha.

Mararka qaarkood qofka dhallinta ah waa laga fogeyn karaa waalidkiis ama waalidkeed ama dadka mas'uulka ka ah markii ay codsadaan qof aan ahayn DCYF - tusaale ahaan, waalidka dhallinta ayaa dooran kara inuu udhiibo isaga ama iyada xubnaha ka tirsan qoyska. Dhallinta ku nool qaab nololeed noocan ah ayaa guud ahaan loo arkaa inay ku nool yihiin daryeelka qaraabada aan rasmiga ahayn, oo aan ahayn xanaanada foster-ka. Haddii aadan hubin inaad kujirto daryeelka korniinshaha waa inaad la xariirtaa xariirka deegaanka halkaan 1-800-723-4831.



BAD-QABKA IYO WANAAGA

Iyagu waa XUQUUQDAADA. Ogsoonow.

Haddii aad tahay qof dhalin yar oo kujira xanaanada foster-ka, Waxaa xaq uleedahay in:

- Lagaa ilaaliyo waxyeelada iyo dayaca.
- Lagaa Haqab tiro baahiyahaaga aasaasiga ah sida (cunno, dhar, hooy iyo waxbarasho).
- Ka xoroowdo edbinta naxariis la'aanta, cabsi gelinta ama aan aaminka aheyn.
- Kudhaqanto diintaada aad heeysato ama aad iska dhaafto gebi ahaanba.
- Soosheegto xadgudub, dayacaad, lagugu takri falo ama ku xadgudubka xuquuqda shaqsiyeed adoon ka cabsan ciqaab, fara-gelin ama ku-qasbid.
- Kaqeeyb qaadata nashaadaadka caruurnimada caadiga ah sida kuwa (habeen laqaadato asxaabta, nashaadaadka iskuulka kadib iyo ciyaaraha).
- Laguula dhaqmo si caddaalad ah oo sinnaan ah, wax kasta oo jinsigaaga ahaado, aqoonsigaaga jinsiga, sinjigaaga, diintaada, qoowmiyaddaada, dhaqankaaga iyo asalkaada dhalasho, naafo, dhibaatooyin caafimaad ama jihada galmada oo waana in lagugu yeera magaca (magacyada) jinsiga aad door bidayso.

Sharciyada Gobolka Washington ee Saamaynaya Dhalinta kujira daryeelka korniinshaha

Marka loo eego shuruudaha shati bixinta Gobolka Washington, adeeg bixiyayaasha daryeelka korniinshaha waxaa looga baahan yahay inay:

- Bixiyaan adeeg kuhaboon koriimada iyo tageerida.
- Bixiyaan agab munaasib ah iyo tababar ku saabsan daryeelka shaqsiyeed, nadaafadda iyo isu-diyarinta.
- Bixiyaan cunto caafimaad leh oo qiyaastaada ah kuna habboon da'daada iyo heerkaaga waxqabadka.
- Kuu edbiyaan qaab ku habboon heerkaaga qaan-gaarka, heerka koritaanka iyo heerkaaga caafimaad.

Xusuusin: Adeeg bixiyayaasha daryeelka korniinshaha ee shattiga leh ayaa laga mamnuucay inay isticmaalaan:

- Korinta ama qaabab edbin oo ay kujirto adeegsiga ciqaabta jirka (garaacista), hurdo xumo (inuusan kuu ogolaan inaad seexato) ama xakamaynta iyo / ama kugu xiro qol ama dhismo.

Adeeg bixiyayaasha daryeelka korniinshaha shattiga leh waa inay raacaan Heerka waalidka macquul ah oo miyir leh:

- Daryeel bixiyayaasha ayaa, iyagoo aan kulug laheysiinin kiis-haya ama maxkamada, oggolaan karo nashaadaadka caruurnimada caadiga ah taas oo ku saleysan waxa waalid macquul ah oo miyir leh uu sameyn lahaa.
- Daryelayaasha waxay oggolaan karaan soodhexista habeenkii meelo kale illaa 72 saacadood.

Waa NOLOSHAADA. Kaqeybgal.

Sida kadhallinyara ahaan ku jira daryeelka korniinshaha, waxaa jira adeegyo badan oo aad heli karto. Kala hadal kiis-hayahaaga wixii kusaabsan sida aad:



- Ucodsan karto oo aad uheli karto adeegyada Nololeed oo Madax-bannaan, haddii aad ku jirto daryeelka korniinshaha 30 maalmood oo dhaafsiisan da'da 15.
- U sameeysan karto qorshaha kala-guur markii aad ka tageyso daryeelka korniinshaha.
- Ujoogteen karto helitaanka daryeelka korniinshaha iyo adeegyada taageerada wixii ka dambeeya da'da 18, haddii aad ku tiirsanaato dhalashadaada 18-aad oo waxaa:
 - Ka diwaangashantahay dugsiga sare ama barnaamijka u dhigma dugsiga sare;
 - Ka diiwaangashantahay, codsatay, ama muujin karto damac ah in lagaa diiwaan geliyo waxbarashada dugsiga sare kasareeyso ama post-secondary vocational certification program (barnaamijka shahaadada xirfadda dugsiga sare kadib);
 - Kaqeybgaleeysaa barnaamij ama howl nashaadeed loogu talagalay in lagu hormariyo ama lagu talaalo caqabadaha shaqada;
 - Lagushaqaaaleeysiiyay 80 saacadood ama in ka badan bishii; ama
 - Awoodi karin inaad kaqeyb gasho mid ka mid ah howlaha kor ku xusan xaalad caafimaad oo la diiwaangeliyay awgeed.
- Codso foojarka guryeeynta, taas oo kuxiran meesha aad ku nooshahay, haddii aad katageyso xanaanada foster-ka dhalashadaada ama ka dib dhalashadaada 18aad. foojarka guryeeynta waa qeyb lacag bixin ah oo loogu talagalay ijaarka ka dib katagitaanka xanaanada foster-ka. Foojarrada ayaa laga heli karaa meelaha qaarkood ee gobolka.

Waxaa sidoo kale kala hadali kartaa kiis-hayaaga wixii kusaabsan:

- Talaabooyinka aad qaadi karto si aad shaqo ku hesho.
- Talaabooyinka aad qaadi karto si aad u hesho kaarkaaga aqoonsiga gobolka, waxbarashada wadista iyo laysanka darawalnimada.

DHAGEYSIGA DACWADAHA EE MAXKAMADAHA

Iyagu waa XUQUUQDAADA. Ogsoonow.

Sidii qof dhalin yar oo kujira xanaanada foster-ka, Waxaa xaq uleedahay in:

- Aad hesho qareen Gaar ah oo maxkamad magacaawday (CASA) ama Guardian Ad Litem (GAL, Qareenka Kiisaska ee Ay Magacowdo Maxkamadu) oo loo magacaabay inuu matalo waxa ugu wanaagsan ee dan kuugu jiro oo ku aadan kiiskaaga ku tiirsanaanta.
- Aad codsato qareen waqti kasta kumatalo adiga si aad cod ugu lahaan karto qorshahaaga maxkamadda.
- Aad hesho oo dib ufiirisid faylka kiiskaaga.
- Qorshaha kiiskaaga dib loogu eego maxkamada lixdii biloodba mar.
- Markay da'da 14 tahay ama ka weyn tahay, lagala tashto qorshahaaga joogtada ah.
- Lagu ogeysiyo oo kaqeybgashid dacwa-dhageysiga ku tiirsanaantaada.
- Laguu magacaabo qareen matalo booskaaga lix bilood ka dib marka la joojiyo xuquuqda waalidkaaga.
- Laguu magacaabo qareen haddii aad go'aansato inaad kaqeybqaadato oo aad uqalantid barnaamijka Extended Foster Care (Xanaanada Foster-ka lakordhiyay) (ExtC Foster Care).

Waa NOLOSHAADA. Kaqeybgal.

Inta lagu jiro dacwa-dhageysiga ku-tiirsanaantaada, waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad:

- Xaadirto dacwa-dhageysiga maxkamada.
- Weydiiso waalidka foster-ka ama qof kale oo aad taqaan inuu codsado in lamagacaabo qareen adiga ku matalaaya.
- Weydiiso haddii aad booqan karto adigoo lasocdo qaraabadaada ama qof adiga muhiim kuu ah.
- Weydiiso maxkamadda in aad dib ugu noqon karto gurigaagii. Xitaa haddii waalidiintaada xuquuqdooda waalidnimo la joojiyay, waxaad weydiisan kartaa maxkamadda inay kugu celiyaan waalidkaa ama kuu ogolaato inaad soo booqato. Maxkamaddu waxay bixisaa codsiyada noocaas ah marka ay jiraan xaalado dhif ah; qareen ayaa kuu sharixi kara ikhtiyaarkaan.

Haddii amarka maxkamadda uu sheegayo inaad ku noolaan karin guriga ama haddii maxkamadda kugu xareeyso xanaanada foster-ka, waxaa jira dad ku taageeraya! Kala hadal shaqaalahaaga kiiska wixii ku saabsan helitaanka qareen iyo / ama CASA / GAL haddii mid aan laguu magacaabin adiga.

LIISKA ERAYADA CUSUB EE SHURUUDAHA MAXKAMADA

Qareen:

Qareen (ama “Wakiil”) wuxuu matalaa qaabka aad dooneyso inuu kiiskaagu u dhaco, oo wuxuu udoodayaa adiga inta lajoogo maxkamada dhexdeeda si uu udifaaco xuquuqdaada sharciga ah. Qareennadu waa inay si buuxda u xafidaan waxaad tiraahdid. Si toos ah uma heleysid qareenkaaga xitaa haddii aad mid dalbato. Waqtiga kaliya ee aad si toos ah qareen u heleysid waa haddii xuquuqda waalidkaada la joojiyo oo ay gudubtay lix billood tan iyo markii la joojiyey xuquuqdooda, haddii aad maxkamadda ka codsaneyso in dib loo soo celiyo xuquuqaha waalidnimo ee waalidka ama haddii aad kujirto Extended Foster Care. Sidoo kale waa inaad qareen heshaa haddii aadan lahayn CASA / GAL. La xariir kiis haya-haaga, CASA / GAL ama qareen kasta oo ku lug leh kiiska wixii macluumaad dheeri ah.

Wakiil gaar ah oo ay maxkamada magacaawday (CASA) iyo Mas'uulka koriyaha ee Ad Litem (GAL):

CASA/GAL waa wakiil ay maxkamadda u magacaawday ineey matalaan waxay rumeysan yihiin inay tahay dantaada ugu wanaagsan, taas oo ka duwanaan doonta danaha waalidiintaada, gobolka ama waxaad rabtay in kiiskaada kudhacaan.

Kutiirsan iyo dacwa-dhageysiga kutiirsanaanta:

Cunug ama dhalinyarada waxaa la amraa inuu noqdo kutiirsanaade marka qaaliga maxkamadda dhallinta go'aansado inay lagama maarmaan tahay in la soo dhexgalo si looga ilaaliyo cunugga waxyeelada, dayaca, cidleeynta, ama waxyeelada ka imaan karta waalidka aan awoodin inuu buuxiyo baahiyaha ilmaha. Marka lo go'aamiyo kutiirsanaansho, maxkamadda dhalinyarada waxay qabaneysaa dacwa-dhageysi joogto ah oo lagu go'aaminaayo talaabooyinka ay waalidku qaadi doonaan si cunugga loogu soo celiyo guriga, meesha ilmuhu ku noolaan karo haddii uusan ku noolaan karin guriga iyo waxaa laga qaban karo si loo hubiyo in cunugga si wanaagsan loo xannaaneeyo - in la kormeero, in wax labaro iyo in baahiyahooda la daboolay.



MEELAYN IYO BOOQASHADA

Iyagu waa XUQUUQDAADA. Ogsoonow.

Sidii qof dhalinyaro ahaan oo kujira xanaanada foster-ka, Waxaa xaq uleedahay in:

- Lagu dejiyo guri aad kubad-qabtid, oo baahidaada dabooli kara oona ku siin kara asturnaanta habboon ee baahida shaqsiyeed.
- Lagu dejiyo guri aad lajoogeeyso walaalaha gabdhaha iyo wiilasha markastoo ay suurtagal tahay.
- Lagula dejiyo qof qaraabada ah oo diyaar ah ama awoodo ama qof weyn oo ku habboon oo aad taqaanid kuna qanacsan tahay, markii ay suurtagal tahay kuna habboontahay.
- Xariir joogto ah oo joogto ah ama booqasho waalidiintaada ah, waa hadii aysan maxkamaddu amrin. Xariir joogta ah ama booqashooyinka walaalahaaga markii la idin kala fogeeyay, waa hadii aysan maxkamaddu amrin xariirka ama booqashooyinka aysan ku habooneyn.
- Sameeyso oo aad hesho wicitaano taleefanno gaar ah iyo waraaqo, haddii aysan maxkamaddu diidin mooyaane.
- La noolow cunuggaaga haddii aad waalid tahay oo aad mas'uul ku tahay cunuggaaga.



Adeeg bixiyeyaasha xanaanada foster-ka waxaa looga baahan yahay inay ilaashadaan alaabtaada iyo macluumaadkaaga shaqsiyeed iyagoo:

- Kuu siinaya meel aad ku kaydiso dharkaaga iyo waxyaalahaaga.
- Ku xafidaya diiwaannadaada iyo macluumaadkaaga shakhsiyeed meel qarsoodi ah iyo meel aamin ah. Keliya kala wadhadlaya macluumaadka adiga kugu saabsan iyo qoyskaaga shakhsiyadka sida tooska ah ugu lugta leh qorshaha kiiskaaga.

Waa NOLOSHAADA. Kaqeybgal.

Xariir la yeelo dadka muhiimka ah ee noloshaada.

- Haddii aadan lahayn xariir joogto ah ama booqashooyin waalidiintaada iyo / ama walaalahaaga, waxaad u sheegi kartaa kiis-hayahaaga, CASA / GAL iyo / ama qareenkaaga inaad rabto booqashooyinka inay dhacaan. Ogeysii dadka kale sida ay booqashadani muhiim kuugu tahay adiga iyo waalidiintaada ama walaalahaaga.
- Xitaa haddii laga saaro gurigaaga iyo / ama deriskaaga, dadaal ku bixi inaad xariir joogto ah la yeelato dadka muhiimka u ah noloshaada, sida ehelka, asxaabta iyo macallimiinta. Dadkani waxaa laga yaabaa ama ku lug yeelan karaan nidaamka xanaanada foster-ka. Haddii aad ubaahantahay caawimaad inaad joogteeyso xariirka, weydii kiis-hayahaaga, CASA / GAL, waalidka foster-ka ama qareenka inay ku caawiyaan.



WAXBARASHO

Iyagu waa XUQUUQDAADA. Ogsoonow.

Sidii qof dhalinyaro ahaan oo kujira xanaanada foster-ka, Waxaa xaq uleedahay in:

- Xaadirto Iskuulka.
- Aad iskuulkaagi hore ku sii jir, xitaa markaad u guurto guriga foster-ka, markii ay suurtagal tahay iyo sida ugu fiican oo ay dantaada kujirto.
- Aad bilaawdo dugsi saddex maalmood gudahood markii lagu galsho xanaanada foster-ka ama bedel lagusameeyo meelayntaada.
- Laguu magacaabo xariiriyaha waxbarashadda marka dacwa-dhageysigaada maxkamada dhaceyso hadaad dhigato fasalada 6-12 oo aad buuxiso shuruudahan soosocda:
 - Xuquuqda waalidkaa waa la joojiyey;
 - Waalidkaada lama heli karo sababta oo ah xabsi-ku-hayn ama xadeynno kale;
 - Maxkamaddu waxay xayirtay xariirka u dhexeeya adiga iyo waalidkaa; ama
 - Waxaa lagugu xareeyay goob dhaqan celin dhaqan ahaaneed maxkamaduna way xadiday xuquuqda waxbarasheed ee waaliddiintaada.



Tusmooyinka Guusha:

- Inaa qaadata casharro adiga kugu mashquuliya oo kula loolama.
- Inaa la kulanto la-taliyaha dugsiigaaga sare oo iska hubi inaad raadraaceyso dhibcahaaga looga baahan yahay qalin-jabinta.
- Inaa kulug yeelato nashaadaadyo sida isboorti ama naadiyada dugsiiga kadib. Haddii aadan haysan lacag ama gaadiid la raaco ahna dookhaaga, ka hubi waalidka koriyaha ah, shaqaalaha kiiskaaga ah ama adeeg bixiyaha sida madaxa banaan u nool, maxaa yeelay waxaa jiri kara gargaar adiga laguugu talagalay.

Waa NOLOSHAADA. Kaqeybgal.

Waxbarashadaadu waxay muhiim u tahay mustaqbalkaaga.

- Inaad ku jirto daryeelka kumeel gaarka ah micnaheedu maahan inaad dugsiga seegayso. Haddii dugsiga jiro oo aadan xaadireeynin dugsiga saddex maalmood gudahood markii aad kuxaroota xanaanada daryeelka kumeel gaarka ah ama aad u guurtay guri daryeel oo kale, wac kiis-hayahaaga, Education Advocate (haddii aad mid leedahay), qareen, CASA / GAL ama Education Ombuds (866-297-2597) si aad uhesho caawimaad.
- Haddii aad kujirto waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qabo, waa inaad lahaataa Individualized Education Program (IEP) ama qorshe 504 ah. Weydii kiis-hayahaaga iyo cid kasta oo kale oo ku lug leh kiiskaada haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid oo kusaabsan qorshahaaga IEP ama 504. Kaqeybgal kulamadaada IEP / 504. Haddii aad 14 jir tahay ama ka weyn tahay, qorshahaaga IEP ama 504 waa in looga wada hadlaa kulammadaada Shared Planning.
- Haddii si kumeel gaar ah lagaaga joojiyo ama lagaa ceyriyo, weydiiso ogeysiis qoraal ah oo wac kiis-hayahaaga si aad taageero oga codsato Treehouse Educational Advocate ama wakiil ka socda TeamChild. Weydiiso koobiyada diiwaannadaada waxbarashada iyo warqada buundooyinka kuqoronyihiin oo halagula socodsiiyo wax kusaabsan horumarkaaga dhibcahaaga. Weydii la-taliyaha dugsigaaga ikhtiyaarrada ku saabsan sidii loo gudi lahaa shaqada luntay haddii loo baahdo.
- Kala hadal kiis-hayahaaga, adeeg bixiyaha madaxa banaan ama lataliyaha dugsiga wax kusaabsan fursadaha badan ee waxbarasho oo aad daalacan karto, sida: qaadashada xiisadaha jaamacada kahor dhameynta dugsi sare, waxbarashada kale, waxbarashada xirfadda ama kuliyada si aad u ogaatid midka kugu habboon.
- Kiis-hayahaaga, adeeg bixiyaha madaxa banaan ama lataliyaha dugsiga ayaa kuusharixi karo barnaamijyada/deeqaha waxbarasho ee la heli karo kuwaas oo kaacaawin karo siiwadashada waxbarashaada (kulliyada ama barnaamijyada kale ee tacliinta dugsiga sare ka dib). Kuwaas waxaa ka mid ah:
 - (College Bound Scholarship) Deeqda waxbarasho ee ku aadan kuujka
 - Barnaamijka Nolol Madax-bannaan (Independent Living Program)
 - Waxbarashada iyo Tababar
 - Voucher (ETV) Program (Barnaamijka foojarada (ETV))
 - Governor's Scholarship (Deeqda waxbarasho ee Guddoomiyaha)
 - (Passports to Careers) Baasaboorada Adeeg bixiyaasha


Raadi qof weyn oo taageera kuu noqdo oo kaa caawin kara gaarista go'aano sax ah ee mustaqbalkaaga. Weydiiso kiis-hayahaaga, la-taliye, macallin, ama maamule inuu kaaga caawiyo nidaamka kasta oo aadan si buuxda u fahmin.

DARYEELKA CAAFIMAADKA

Iyagu waa XUQUUQDAADA. Ogsoonow.

Sidii qof dhalinyaro ahaan o kujira xanaanada foster-ka, Waxaa xaq uleedahay in:

- Lagu ogeysiyo baahiyahaaga caafimaad, daawooyinka iyo taariikhda caafimaad.
- Aad hesho baaritaan sanadle ah oo lagu xaqiijinaaya caafimaadkaada.
- Aad hesho baritaanka ilkaha lixdii biloodba mar ilaa da'da 18 iyo sannad kasta laga bilaabo da'da 19 illaa 26.
- lagu ogeysiyo dhammaan faa'iidooyinka iyo halista la xariirta dhammaan daawooyinka ay ku jiraan dawooyinka dhimirka, (daawooyinka awood u leh saameynta maskaxda, shucuurta iyo dabecadda), fiitamiinnada iyo daawa dhireedka lagu qoray ama lagugula taliyay.
- Aad oggolaato ama diido qaadashada daawooyinka ay ka mid yihiin dawooyinka dhimirka, fitamiinnada, daawa dhireedka iyo kaabayaasha kale ee lagu qoro ama lagugula taliyay marka laga reebo in maxkamada ay amartay inaad qaadato.
- Hesho daryeelka caafimaadka taranka, oo ay kujirto xakameynta dhalimada iyo / ama la-talin ku saabsan xakameynta dhalimada, ayadoo laheeyan oggolaanshaha waalidka ama qofka mas'uulka kaa ah.
- Aad hesho ceymis caafimaad iyadoo loo marayo Washington State's health insurance (ceymiska caafimaadka ee Gobolka Washington) (Medicaid) illaa dhalashada 26 aad, haddii aad kujirto xanaanada foster-ka dhalashadaada 18aad.



Haddii aad ka weyn tahay da'da 13, waxaad sidoo kale suurta gal ah:

- Inaad hesho daaweynta bukaan-socodka maandooriyaha ayadoo aan laheeyan oggolaanshaha waalidka ama mas'uulka.
- Inaad hesho daawaynta caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiif ama bukaan-socod ayadoo aan laheeyan oggolaansho waalid ama qofka mas'uulka kaa ah.

Haddii aad ka weyn tahay da'da 14, waxaad sidoo kale suurtagal ah:

- Inaad hesho baaritaan iyo daawaynta cudurrada galmada lagu kala qaado iyadoo aan laheeyan oggolaansho ama ogaalka waalid ama qofka mas'uulka kaa ah.

Waa NOLOSHAADA. Kaqeybgal.

La soco wixii kusaabsan fursadaha iyo adeegyada aad heli karto.

- Haddii uu kuu qoray daawo (yaasha) xirfadyahan caafimaad ama qof kale uu kaa codsaday inaad daawo qaadatid oo aadan rabin inaad qaadatid, kala hadal takhtarkaaga, qareenkaaga, CASA / GAL ama kiis-hayahaaga wixii ku saabsan ikhtiyaarada lagu heli karo adiga.
- Haddii lagu qoro daawo ka hortag xanuunka dhimirka, daawada waa in lagusameeyo dib u eegis oo uu ansixiyo dhakhtar labaad. Haddii dib-u-eegista labaad aysan dhicin, la hadal kiis-hayahaaga, qareenkaaga ama CASA / GAL.
- Haddii aad ogaato inaad uur leedahay, wax ka baro dhammaan ikhtiyaarada aad heli karto. Waa inaad xor u noqotaa inaad sameeyso go'aanka ugu fican, go'aan sifican loogafkiray ee noloshaada iyo nolosha cunuggaaga iyadoo aysan jirin fasax laga qaadanaayo ama cadaadis qof kale kaaga yimaada.
- Waxaad xaq u leedahay caymiska caafimaadka ilaa aad ka gaareyso 26 sano. Hubso inaad kala hadasho kiis-hayahaaga arrimaha ku saabsan qaabka caymiska Medicaid ushaqeeyo illaa da'da 26 iyo inaad kusii jiri karto caymiska haddii aad u guurto gobol kale. Intaa waxaa sii dheer, si loo hubiyo ineeysii soconeeyso helitaankaaga caymiska ka dib markaad ka baxdo xanaanada foster-ka, kala xariir kooxda daryeelka korniinshaha ee MEDS halkaan (Foster Care MEDS) 1-800-547-3109 oo lawadaag cinwaanka boostada.



MASUULIYADHA SHAQAALHA KIISKA

Dhalinyar kasta oo ku jira daryeelka korniinka wuxuu leeyahay kiis-haye kaas oo sameeyo adeegyo ka caawiya qoyska inuu dib umidoobo, markasta oo ay suurtagal tahay waxa uuna ilaaliyaa bad-qabka dhalinyarada iyo in sifican looga taxadaro inta ay kujiraan xanaanada foster-ka.

Waa tan waxa aad ka filan karto kiis-hayahaaga inta lagu jiro xiliga aad kuxareeysantahay daryeelka korniinshaha:

- Inuu kaa caawiyo adiga iyo qoyskaaga inaad heshaan adeegyada diyaarka ah ee idinka caawinaaya inaad ka qooyo ahaan umidoowdaan , markasta oo ay suurtagal tahay.
- Inuu kuu qorsheeyo xariirka iyo booqashooyinka joogtada ah ee lasameeynayso waalidkaa ama walaalaha, hadii aysan maxkamad amrin la inaan lameeyn.
- Inuu baadho fursadaha laguladajinaayo qof qaraabo ah ama qof weyn oo ku habboon, haddii ay kuhabboon tahay, kahor intaan lagu gelin xanaanada foster-ka ee shatiga leh ama guri daryeelka kooxeed.
- Inuu kugu haayo isla dugsiga ama dugsiga degmada (haddii ay mid dhaqan gelin karto oo ay dantaada ugu wanaagsantahay). Inuu kuu gudbiyo Treehouse Educational Advocacy ama Graduation Success oo lagahelo taageerada adeegyada waxbarashada.
- Markaa dāda 12 tahay, inuu kuusharaxo sida aad kucodsan karto qareen kaacaawiyo inaad dhameeystirtid nidaamkaaga kutiirsanaansho iyo inaad maxkamada usheegato baahidaada inaad heshid qareen, hadii taas tahay wax aad rabtid.
- Inuu kudhiibo waalid daryeela ee foster-ka ama daryeeleyaal sifican lootababaray, oo lamarsiiyay baritaan iyo dambi baaris asalkooda ah, iyo kuwaas oo helay taageero ku filan oo ka caawisa sameeynta deganaanshaha meesha aad kuxareeysantahay.
- Inuu xaqiijiyo in kiiskaaga ku tiirsanaanta laga furo maxkamada oo dacwada ladhageesto lixdii biloodba mar.
- Inuu kuusheego adiga goorta la qabanayo dacwad dhagaysiga ku-tiirsanaantaada.
- Inuu kaacaawiyo ama uu kuu fududeeyo safarkaada aad kutageeyso iyo kan aad kaga soolaabaneeysid dacwad-dhageysiga maxkamadda ee laga yaabo inaad rabto inaad ka qeybgasho.
- Inuu kusiiyo macluumaad ku saabsan xuquuqaha aad leedahay iyo waajibaadka CA haddii aad uur leedahay ama waalid tahay.
- Inuu kusiiyo ilo warbixino ku saabsan adeegyada dabooli kara baahiyahaaga shaqsiyeed oo dhan haddii aad uur leedahay ama waalid tahay.
- Inuu ku arko ugu yaraan bishii mar si uu kaagala hadlo qorshaha kiiskaaga oo ay ku jiraan nabadgelyada, jiritaankaaga iyo wanaaggaaga.



Kiis-hayahaaga ayaa sidoo kale kaala hadli doona wixii ku saabsan:

- Sababta aad ugu jirto daryeelka korniinshaha.
- Sida nidaamka daryeelka korniinshaha uu u shaqeeyo.
- Waxa kugudhici doona adiga iyo qoyskaaga, oo ay ku jiraan walaalahaaga.
- Waxa lagaa filanaayo adiga intaa kujirto meesha lagugu xareeyay ee daryeelka korniinshaha.
- Waxa lagala jeedo qorshaha kiiska iyo waxa lagu soo daray qorshaha kiiskaaga.
- Waxa lagala jeedo qorsheeynta kala guurka iyo adeegyo nuucee ah ama xirfado aad u baahan tahay inaad si madaxbannaan u noolaatid
- Dadaalada la sameynayaa ee loogu talagalay in si nabadgelyo ah ay dib ugu midoobaan qoyskaaga.
- Waxyaabaha aad daneeynayso oo uu kusiiyo fursado aad kusameeyso waxqabadyada “caadiga ahl” ee caruurnimada.
- Maxaa dhici doona haddii aad wali ku jirto daryeelka korinta da’da 18 iyo sida aad ugu diyaarin karto u gudbida qaangaarnimada.

Dhallinta ka weyn da’da 14, kiis-hayahaaga ayaa:

- Qaban doono warbixinta amaahda macaamiisha sanadlaha ah oo xallinaaya wixii khilaafaad ah ee yimaada ilaa aad kareyso 18 jir.
- Kugu soodari doona dhammaan kulamada joogtada ah iyo shirarka Shared Planning waxayna ku siinayaan ikhtiyaarka aad kucasuumi karto laba qof, oo aan ahayn kiis-hayahaaga iyo waalidka daryeelka korniinshaha, inay kaagala soo qayb galaan kulamadaas.
- Ogaan doono adeegyada ama xirfadaha aad ugu baahan tahay qorsheynta kala-guurka.
- kulashaqeeyn doona adiga, daryeelahaaga iyo nidaamyada taageerada ee dhammaystirka qorshaha kala-guurka ee ka guurista daryeelka korniinshaha.
- Qaban doono Kulamada Shared Planning ee udhaxeeya da’da 17 iyo 17.5 oo kuuna sameeyn doono adiga qorshe aamin iyo guul ah oo ku’aadan inaad baaluqday. Ogaan doono oo fahamaaya habka loo codsado sii joogista xanaanada daryeelka korniinshaha iyo adeegyada taageerada dhaafsiisan da’da 18 iyadoo lamaraayo barnaamijka EFC.
- Kusiin doona dukumentiyada shaqsiyadeed markii loo baahdo iyo markaad aad kabaxeyso xanaanada daryeelka korniinshaha, oo ay ku jiraan shahaadada dhalashada, kaarka social security, Aqoonsiga Gobolka, Diiwaanka tallaalka, Warqadda maxkamadda, macluumaadka ceymiska ee caafimaadka iyo koobiyada diiwaanada caafimaadkaaga iyo waxbarashadaada. Waxaad sidoo kale codsan kartaa diiwaannadaada kadib markaad ka tagto daryeelka korniinshaha.

TALOOPYIN DHEERAAD AH

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa webseetka: www.independence.wa.gov.

Waxaad la xariiri kartaa DCYF Xariiriyaha arrimaha deegaanka haddii aad qabtid wax su'aalo ah, cabasho ama walaac ah oo ku saabsan kiiskaaga. Shaqaalaha Xidhiidhada Deegaanka ayaa kugu soo celin doona wicitaankaaga 24 saacadood gudahood waxayna kaala shaqeyn doonaan xallinta cabashadaada ama waxa aad ka welwelsan tahay. Intaas waxaa sii dheer, shaqaalaha ayaa kaa caawin doona fahamka nidaamka daryeelka carruurta iyo horumarka kiiskaaga shakhsi ahaaneed. La xariir waaxdaa xariirada ee DCYF adoo emayl u diraya DCYF **ConstRelations@dcyf.wa.gov** ama adigoo wacaaya 360-902-8060 ama 1-800-723-4831.

Haddii aad dareento in xuquuqdaada aan la ilaalinayn, la xariir kiis-hayahaaga, GAL / CASA ama qareenkaaga.

Waxaa kale oo aad weydiisan kartaa XOffice of the Family and Children's Ombuds inuu baaro kiiskaaga.

Office of the Family and Children's Ombuds

6840 Fort Dent Way, Suite 125

Mail Stop TT-99

Tukwila, WA 98188

Taleefanka bilaashka ah: 1-800-571-7321

Taleefan: 206-439-3870

TTY: 206-439-3789

Fakiska: 206-439-3877

ofco.wa.gov

Your Rights, Your Life waxaa lagu soo saaray dadaallada wadajirka ah ee Mockingbird Society iyo Maamulka Carruurta, oo hadda ah qayb ka mid ah Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Gobolka Washington ee Carruurta, Dhallinta, iyo Qoysaska).

Mockingbird Society iyo DCYF waxay jeclaan lahaayeen inay u mahadceliyaan dhalinyarada aadka u fiican iyo kuwii dhameestay daryeelka korniinshaha ee gacan ka gaystay mashruucaan, geesnimadiisa, adkeysigiisa, iyo rajada ay siinayaan dhiira gelinta shaqada aan qabano. Intaa waxaa sii dheer, waxaan jeclaan lahayn inaan uga mahadcelino ururrada soo socda kaalmadooda dib-u-eegista iyo tafatirka cusboonaysiinta buug-gacmeedkan:

Columbia Legal Services

Treehouse

Office of the Family iyo Children's Ombuds

Mockingbird Society waa hay'ad u doodda oo la shaqeysa dhalinyarada iyo qoysaska si loo wanaajiyo daryeelka korniinshaha iyo dhammeynta hoy la'aanta dhalinyarada. Barnaamijyadeenna dhalinyarada waxay tababaraan dadka dhalinyarada ah ee guri la'aantu ku dhacday ama kujiro daryeelka korniinshaha inay noqdaan u doodaha nafsadooda ugu fiican. Markay sidaas sameeyaan, waxay baddelaan sharciyada iyo aragtida hor istaago wadada cunug kasto inuu heysto guri aamin ah oo deggan Barnaamijyadayada qoyskeena waxay u doodaan hal abuurka habka adeegyada loo bixiyo sida daryeelka korniinshaha. Si wada jir ah, xalkeenu waxa uu diirada saaraysaa hagaajinta nidaamyada adeegga bulshada ee ugu dambeyntii u adeega kumanaan carruur ah, dhalinyaro iyo qoysas ah sanad walba Washington iyo wixii ka dambeeya.

2100 24th Ave S. Ste. 240

Seattle, WA 98144

teleefan: (206) 323-KIDS (5437)

Fakiska: (206) 323-1003

E-mayl: info@mockingbirdsociety.org



The Mockingbird Society

Improving foster care | Ending youth homelessness

Mockingbird Society waa urur laga dhaafay canshuurta ee gobolka Washington 501(c)(3). Dhammaan tabarucaada waxaa laga gooyin karaa canshuur ilaa inta sharciga faraayo oo dhameestiran. Fadlan kala tasho la-taliyahaaga cashuurta wixii ku saabsan xaaladaada cashuureed ee gaarka ah.

Passion to Action (P2A) waa gole talo-bixin dhalinyaro ah oo ay horseed u yihiin dhalinyarada DCYF. DCYF waxay fahamsan tahay muhimadda iskaashigeenna aan lasameynayno dhalinyarada ee ku aadan howsha aan qabanno. Xubnaha P2A waxay siinayaan DCYF talo soo jeedin, talooyin iyo soojeedino ku saabsan siyaasadaha hay'adda, dhaqammada iyo daabacaadaha. Intaa waxaa sii dheer, DCYF waxay u adeegsanaysaa xubnaha P2A in badan oo ka mid ah koorsooyinka tababarka hay'adda iyo soojeedinta si loo hubiyo in shaqaalaha kiisaska, waalidiinta daryeelka korniinshaha bixiya iyo bulshada inteeda badan ay wax ka bartaan waayo-aragnimada ku jirta nidaamka daryeelka korniinshaha ayna kabaryaan kuwa khibrad u leh, dhalinyarada kujira daryeelka iyo kuwii dhameestay.

P2A waxay siisaa haggis loogu tala galay dhalinyarada raba inay u doodaan dhalinyarada kale iyagoo la shaqeynaaya facooda asal ahaan isku meelka kasoo wada jeeda. P2A waxay kobcisaa hormarisaa saaxiibtimada, hogaaminta, xirfada iyo guusha xubnahayaga.

www.dcyf.wa.gov



Haddii aad jeceshahay koobiyada dukumintigaan oo qaab kale ah ama luuqad kale ku qoran, fadlan la xariir Laanta xariirada ee DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).